

Tallaabooyin lagu adkaynayo awood bixinta daymaha shirkadaha oo si toosah u billaabmi doonta

Inta aynu ku guda jirno xilliga dhibaataada taas oo ay ganacsato badan aad u samaynayso, waxay degmada Eslöv go'aansatay in ay qaado tallaabooyin badan oo ku salaysan cudurka faafa si aysan u sii xummaan xaalada adag ay ganacsatadeenu ku sugan yihiin.

Xaalada imminka lagu sugan yahay waxay degmada Eslöv go'aansatay tallaabooyinka soo socda. Qoraalka taxan waxbaa iska bedeli kara, iyada oo ay ku xiran tahay isbedelka xaalada markaas uu yahay faayriskacorona covid-19.

- Waxaynu dib u dhigaynaa bixinta lacagta qidmada, waanu dheeraynaynaa mudada lacag bixinta ee qidmada sanadka iyo kan adeega iyo ruqsada shatiga qamriga, ruqsadaha kale ee arimaha kormeerka sidoo kale in loo ogolaado in dib loogu soo celiyo lacagta hadii ruqsada lagalla laabto.
- Waxaynu u dheeraynaynaa mudada ruqsada loo qabtay ee arimaha kormeerka hadii ay suurtagal tahay.
- Waxaynu mudnaanta siin doonaa hawlaha xaalada adag ku jira ee ruqsadaha iyo tan howsha kormeerka.
- Waxaynu wadahalal la yeelanaynaa wax ku saabsan ruqsadaha socda iyo howsha kormeerka socota. Haddii ay shirkadu ama hakad galinayso ama ay joojinayso?
- Waxaynu dib u dhigaynaa booqasho kormeerka meelaha aan dhibaataada ka jirin.
- Waxaynu dib u dhigaynaa ilaa iyo dayrta qidmada hubinta bay'da iyo baaritaanka raashinka.
- Waxaynu siineynaa u ukaadin/dheerayn mudada bixinta kirada goobaha degmadu leedahay
- Waxaynu nahay kuwa dhagaysta talada ku saabsan rabitaanka ah in mudada gaaban lacagta lagu siiyo badeecad keenaha iyo adeegyada ku socota degmada.
- Waxaynu kula dhaqmaynaa dabecad deeqsinimo ah badeecad keenayaasha hadii ay joojiyaan shir, cashar jeedin, safar iwm, tusaale iyaga oo kala qaybinayo bixinta asalka sicirka lacagta uu ahaa.

- Waxaynu ogolnahay in mehradaha cutada dibada lagu cunteeyo sanadka oo idil, waana qidmad la'aan inta u dhaxaysa 1marso ilaa 30 juun, haddii uu jiro kahortag sahli doona in uu yareeyo faafida cudurka (Ogow in ruqsada mehrada in cuntada lagu cunteeyo dibada u baahan tahay ruqsad polis).
- Waxaynu siinaynaa jaaliyadaha iyo ururada ka mid ah (kultur och fritid) maamulka dhaqanka iyo goobaha cayaaraha xuquuq ay uga baxaan mudooyinka ay balansadeen muddo gaaban iyagoon ganaax bixin ka bixida ay ka baxeen balantoodii.
- Waxaynu siinaynaa fursad howlaha mehradaha in ay miisaskooda dibada dhigi karaan si ay u tusaan macaamiisha waxa ay iibinayaan(ogow in ay tani ubaahan tahay ruqsad polis).
- MERAB waa ay u sahlaysaa duruuf jirta awgeed ganacsatada, ururada ama jaaliyadaha ciddii doonaysa in dib looga dhigo qidmada qashin ka qaadida iyaga oo ogolaanaya amaahda waqti bixinta mudo 90 maalmood iyadoon dulsaar iyo qidmad dheeraad ah lahayn.
- Waxaynu si aanu mugdi ku jirin ugu dammanad qaadaynaa shirkadaha macluumaad cusboonaysiin leh.

Fariintayada muwaadiniintu waa: taagero iyo gacan ka gaysasho ganacsatada deegaanka ah.

Isbedelkan iyo dadaalkan wuxuu ahaanayaa mid sii socda, ujeedaduna waa taagerid xilliga uu faayriskacorona covid-19 uu yahay cudur faafaya.

Kontakta:

Lars Persson, näringslivschef

Telefon: 0721-88 54 94

E-post: lars.persson2@eslov.se